

## **Waxaad dhameysay Qiimeynta Adeega Geynta!**

Dukumiintigan ayaa kaa caawin doono in aad fahanto waxa aad u baahan tahay in aad ogaato si aad u isticmaasho fursadaha kala duwan ee adeega geynta. Ayadoon la fiirineynin habka aad dooratay, tani waxa ay kuu diyaarineysa sida aad guul uuga gaari karto.

Haddii aad u baahan tahay in aad hesho shaqaale dib u dejin, fadlan booqo: <https://ircc.canada.ca/english/newcomers/services/index.asp>

Haddii aadan wali sameynin imtixaanka ama qiimeynta English-ka ee CLB, waad wici kartaa si aad balan u qabsato. Halkaan ayaad ka heli kartaa liiska xarumaha:

<https://www.language.ca/resources/expertise/for-language-learners/#1473771803983-0f2b7a24-0d0f>

Waa kuwan qaar kamida walxaha ay tahay in aad tixgeliso, marka loo fiiriyo habraaca aad dooratay:

### **Haddii aad dooratay in aad isticmaasho adeega ONLINE ama HYBRID, waxaa fikrad wanaagsana:**

1. **In aad sii ogaato qalabka aad u baahan tahay.** Ka qeyb qaadashada habka online-ka ah ama hybrid-ka waxa ay inta badan u baahan tahay in aad heysato aalada kombiyuutarka. Mar marka qaar, waxaad kaga qeyb qaadan kartaa adigoo isticmaalaya taleefankaaga ama tablet/aybaad. Weydii maareyaha mashruuca/adeega qalabka aad u baahan tahay iyo haddii aad amaahan karto qalabka marka aad u baahan tahay.
2. **Tijaabi qalabkaaga.** Waxaad tijaabin kartaa kaamirada iyo cod qaadaha kombiyuutarkaaga in ay shaqeynayaan adigoo booqanaya boggan: <https://www.loom.com/webcam-mic-test>
3. **Iska fiiri xawaaraha internet-kaga.** Isgaarsiinta muuqaal baahinta, waxaa wanaagsan in aad heysato internet xawaarihiisa ku gurida iyo soo dajintuba ugu yaraan yahay 2 Mbps. Halkaan ayaad ka tijaabin kartaa xawaarahaaga internet-ka. <https://www.speedtest.net/>
4. **Diyaar garoow.** Ka diyaarso gurigaaga boos aad kala socon karto mashruucaaga online-ka ah. Waxaa wanaagsan in uu boosku yahay mid kuu qaasa oo qeylo laheyn.



5. **Qabso waqti.** Qorshayaasha online-ka ama hybrid-ka ayaa u baahan karo wax qabadyo waqtiga taagana (isla waqtigaasa socda) ama waqtiyo kala duwan (waqtiyo goos goosa). Dad badan ayee dhib ku tahay maareynta ama kala saarida waqtiyada kala duwan. Isku day in aad naftaada waqti u qabato. Qorsheyso in aad sameyso howshaada waqtiyada aadan daalneyn maalintii.
6. **Raadso kaalmo.** Ma heystaa saaxiib ama xubin qoyska kamida oo kaa caawin karto ciladaha farsamo? Ma weydiisan kartaa caawinaad baraha mashruuca/hogaamiyaha? Ma heli kartaa in lagaa caawiyo xanaanada caruurta intaa online-ka tahay? Ka fikir kaalmooyinka aad u baahan tahay si aad u guuleysato.

**Haddii aad dooratay in aad isticmaasho adeega KULAN-SHAQSIGA ama HYBRID, waxaa fikrad wanaagsana:**

1. **In aad fiiriso waqtigaaga.** In aad qiimeyso waqtiga aad galin karto mashruucaaga. In badan dadka waa weyn ayaa sidoo kale u baahan waqti shaqo iyo masuuliyadaha qoyska. Tix gelin midka kuu haboon waqti kaamila (full-time) ama shifti (part-time) midka adiga kuu roon.
2. **Diyaarso kaalmo caruurta, haddii aad u baahan tahay.** Mashruucyada qaar ayaa bixiyo xanaanada caruurta. Haddii aysan jirin, waxaad u baahan tahay in aad hesho xarun xanaanada maalin-laha ama saaxiib/ehel kuu xanaaneya ilmaahaga adiga. Boggan ayaa ku caawin karo: <https://findingqualitychildcare.ca/finding-child-care/child-care-in-each-province-and-territory>
3. **Qorsheyso wadadaada.** Ka raadi mashruucaga maabka siina diyaarso wadooyinka aad sii mari laheyd si aad u gaarto. Waxaa sidoo kale wanaagsan in aad sii fiiriso inta ay kugu qaadaneyso in aad halkaas tagto. Waxaad booqan kartaa boggan: <https://maps.google.ca/>